


Tababarka Xalalka waara ee loogu talagay Bulshooyinka uu Saameyey Barakaca ee ku sugan Somalia

Kulanka 4aad:Maxay yihiin mabaadi'da iyo shuruudaha xukuma habsocodka howlaha Xalalka waara?

Soo Koobid

Kulanka ugu dambeeyay ee qaybta 1-aad waa kulanka noo suurta gelin doona inaan u kala-gudubno qaab-dhismeedka fikradeed ee xalalka waara iyo xalalka waara ee lagu dhaqmo hada (ama sida loo sameeyo xalal waara?) ee ku jira koorsada 2aad. Kulankan wuxuu ku saabsan yahay mabaadi'da iyo shuruudaha hagi doona geedi socodka xalka waara, qorsheynta iyo habeynta barnaamijyada. Qaybta koowaad ee kulanka wuxuu u heellan yahay mabaadi'da habeynta barnaamijyada xalalka waara ee la aqbalay halka qaybta labaad diiradda lagu saari doonaa 8-da shuruudood ee ah qaab-hawleedka ugu muhiimsan ee qorsheynta iyo cabirka xalalka waara. Qeybta ugu weyn ee kulanka wuxuu qaadan doonaa qaab hawleed ujeedkiisu yahay bilowga aqoonsiga caqabadda ugu weyn ee hortaagan in la gaaro xalal waara gudaha Soomaaliya / goobta iyo ururada ugu waaweyn ee hawsha wada.

Ujeedooyinka

Dhamaadka kulankaan waxaad awoodi doontaa inaad:

- Ku dabbaqto mabaadi'da muhiimka ah ee hagaysa geeddi-socodka xalalka waara iyo dejinta barnaamijyada ka socda Soomaaliya.
- Sharaxdo 8da shuruudood ee loo sameeyay in lagu cabbiro heerka horumarka loo qaadayo xagga xalalka waara
- U adeegsato 8da shuruudood inaad kubilaawdo fikirka ku saabsan caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan xalalka waara ee Soomaaliya / Goobta ka mid ah Soomaaliya

Fariimaha Muhimka ah

1. **Mabaadi'da dejinta Barnaamijyada Xalalka Waara waxaa ku heshiiyey wada-hawlgalayaal badan oo ka tirsan Soomaaliya, oo ay ku jiraan mas'uuliyiinta qaran waana inay hagaan geeddi-socodka xalalka waara.**
2. **Xalalka waara waxaa la gaaraa marka Bulshooyinka Barakaca saameyey ay helaan xuquuqdooda iyo adeegyada la xiriira iyadoo ayna jirin eexasho/kala sooc/takoor ku saabsan barakacooda. Sidaa darteed xaaladdooda waa in lala barbardhigaa xaaladda dadka intiisa kale / bulshada martida loo yahay.**
3. **Qiimeyntan iyo isbarbar dhiga waxaa lagu sameyn karaa iyadoo la adeegsanayo 8da shuruudood oo ah qaab guud**

Ogsoonow in qoraallada fududeynta iyo talooyinka iyo sidoo kale farriimaha muhiimka ah lagu xusay bog kasta oo ku jira sanduuqa qoraalka.

Habka Gudbinta Casharada

Qaab-dhismeedka

Kulankaan waxaa loo qaabeeyey ku dhowaad laba qaybood oo waaweyn wuxuuna ku dhammaadaa hawl dheer.

1. **Mabaadi'da meelmarinta barnaamijyada xalka waara.** Mabaadi'daan waxaa la soo saaray iyadoo lagu saleynayo khibrada laga helay barnaamijyo xal waara oo laga hergeliyey Soomaaliya waxaana si tartiib tartiib ah u qaatay la-hawlgalayaasha la shaqeeya ReDSS iyo Dowladda / maamulada maxalliga ah. Ujeeddada qaybtan ayaa ah ka qaybgalayaasha inay si fiican u fahmaan waxa ay u taagan yihiin oo ay u qaataan sidii mabaadi' hagta barnaamij kasta oo xal waara ah. Qoraalo mabaadi'da ayaa loo qaybinj doonaa ka qaybgalayaasha.
2. **Shuruudaha xalalka waara:** ujeedada laga leeyahay ayaa ah in la soo bandhigo shuruudaha oo ah bar bilow waxtar u leh falanqaynta xalalka waara iyo in xooga la saaro xaqiiqada ah in falanqayn lagu sameyn doono marka lala barbardhigayo dadka aan soo barakacin, oo ay suuragal tahay in ay yihiin bulshada martigelisey.
3. **Hawl: Hawsha ugu dambeeysa ee koorsada waa falanqaynta koowaad ee caqabadaha hortaagan xalalka waara iyadoo la adeegsanayo shaxda shuruudaha IASC**

Wakhtiga

Kulankaan waxaa loo qorsheeyay inuu socdo hal saac iyo bar

- Qiyaastii 20 daqiiqo qeybta 1
- Qiyaastii 10 daqiiqo qeybta 2
- Qiyaastii 60 daqiiqo oo loogu talagalay waxqabadka ugu dambeeya oo ay kujirto is-xog-wareysi qiimeyn ah

Hawlaha

I. Mabaadi'da meelmarinta Barnaamijyada Xalalka Waara

Hawsha 1aad: U qaybi ka-qaybgalayaasha laba-labo ah oo labo kasta u yeel 'mabda'. Weydii inay ka fikiraan waxa ay ka dhigan tahay iyo tusaale muujinaya ilaa 5 daqiiqo. Qaybi warqadaha casharka mabaadi'da oo samee is-xog-wareysiga qiimeynta ah, laba-labo kasta mar adigoo weydinaya laba kasta fikradahooda ka dibna ka akhrinaya sharraxaadda mabda 'kasta qoraalka.

II. Shuruudaha Xalka Waara iyo Falanqaynta

Hawsha 2aad: u qoondee shuruud koox kasta (suurta galnimada laba; iyadoo ay kuxiran tahay tirada kaqeybgalayaasha / kooxaha weydiina koox walba inay:

- Ku sharax luqad cad waxa shuruudahoodu ku saabsan yihiin iyo sida qaabkan loogu dejiyo: Bulshooyinka barakaca saameyey waa inay helaan (shuruuda iyo sharraxaaddeeda) iyadoon takoorid jirin oo loo aanayey barakacooda darteed.
- Aqoonso maxay yihiin caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan hanashada xuquuqdan ee qaxootiga-soo-noqda / barakacayaasha iyo bulshooyinka martigeliyey.
- Bilow aqoonsiga ururada waaweyn ee ay tahay inay mas'uul ka noqdaan hubinta in xuquuqdaas ay helaan Bulshooyinka barakaca saameyey.

Waxay u adeegsan karaan muunada shaxda si ay ugu taxaan jawaab bixintooda.

Waqtiga hawsha: inta udhaxeysa 40 ilaa 50 daqiiqo oo shaqada kooxda ah iyo ilaa 14 daqiiqo oo is-xog wareysi qiimeyn ah

Diyaarinta

- ☐ Hawsha 1aad: Daabac casharada mabaadi'da melmarinta barnaamijyada xalalka waara. ka qaybgale kasta mid.
- ☐ Hawsha 2aad: Daabac muunada shaxda hawsha, kaqeyb galahiiba mid

Maqaalo Qoraal oo faaido leh

- ☐ Qaab dhismeedka IASC ee Xalalka Waara, 2010 (https://www.unhcr.org/50f94cd49.pdf)
- ☐ Qaabdhismeedka Xalka ReDSS (Solutions Framework | Regional Durable Solutions Secretariat (regionaldss.org))